Casharka 37

1. Waa kuma kii qoray shanta kitaab ee ugu horreeya kitaabka Baybalka?
-Muuse.

2. Sidee baa Muuse garanayaa waxa la qorayo?
-Ilaah wuxuu ilaaliyey Muuse si uu u qoro wax kasta ee Ilaah doonayey inuu qoro.

3. Maaddaama ay reer binu Israa'iil ku dhex safrayeen, sidee bay ku garteen dhulkii ay ku socdeen?
-Ilaah baa hoggaaminayey.

4. Halkee buu Ilaah ku hoggaaminayey?
-Ilaah wuxuu ku hoggaaminayey dhulkii reer Kancaan, waa dhulkii uu ka ballan qaaday awowgood Ibraahim.

3. Markii Israa'iil ay yimaadeen xuduudka dhulkii Kancaan, maxaa Muuse u sheegay inuu sameeyo?
-Ilaah wuxuu Muuse ku yiri, waxaad 12ka qabiil ee reer binu Israa'iil kala soo baxdaa 12 nin oo dhulka taga oo soo baara.

6. Maxaa tobankii nin ee aan Ilaah rumaynin, aanay u doonayn inay galaan dhulka Kancaan?
-Tobanka nin waxay ka baqayeen dadkii xoogga weynaa ee ku noolaa dhulka Kancaan.
-Tobanka nin ma ayan rumaysnayn in Ilaah awood u leeyahay inuu ka adkaan karo dadkii reer Kancaan.
-Tobanka nin ma aysan rumaysnayn ballankii Ilaah siiyey Israa'iil ee ahaa inay dhulka qaadan doonaan.



7. Maxaa Kaaleeb iyo Yashuuca u doonayeen inay galaan dhulkii Kancaan?
-Kaaleeb iyo Yashuuca kama ayan baqaynin dadka xoogga weyn leh ee ku noolaa dhulkii Kancaan.
-Kaaleeb iyo yashuuca waxay rumaysteen in Ilaah awood u lahaa inuu wiiqo dadka deggan dhulka Kancaan.
-Kaaleeb iyo Yashuuca waxay rumaysteen in Ilaah uu dhowrayo ballankiisii ahaa inuu dadkiisa Israa'iil siin doono dhulka Kancaan.

8. Haddii aynaan rumaysan farriinta Ilaah, maxaynu Ilaah ugu yeeraynaa?
-Beenaale.

9. Maaddaama reer binu Israa'iil ay diideen inay Ilaah rumaystaan, yaa gelaya dhulka Kancaan?
-Waxaa gelaya Kaaleeb, Yashuuca, iyo carruurta reer binu Israa'iil.

10. Maadaama reer binu Israa'iil ay diideen inay Ilaah rumaystaan, sidee baa Ilaah iyaga u ciqaabayaa?
-Ciqaabtu waxay noqonaysaa inaanay Kancaan gelin.
-Waxay giddigood ku dhiman doonaan lama-degaanka.

-Maaddaama Israa'iil ay diidday inay rumaysato Ilaah, ma ayan gelin dhulkii Kancaan, laakiin waxay warwareegi jireen cidlada.

-Makr areer binu Israa'iil ay yimaadeen Qaadeesh, ayaa waxaa dhacday in dadkii biyihii ka dhammaadeen.

-Maxaad u malaynaysaa inay reer binu Israa'iil sameeyeen?

Bal aynu akhrinno Tirintii 20:1-5

1-Oo reer binu Israa'iil, xataa shirkii oodhammu waxay cidladii Sin yimaadeen bishii kowaad.  Markaasaa dadkiiw axay degeen Qaadeesh, oo maryanna halkaasay ku dhimatay, oo halkaasaa lagu aasay.

2-Oo shirkiina biyyo ma haysan, oo markaasay Muuse iyo Haaruun u wada shireen.

3-Kolkaasaa dakii Muuse la dirireen, wayna la hadleen oo ku yidhaahdeen, Waxaa noo roonayd inaannu walaalahayo iskala dhimanno markay Rabbiga hortiisa ku dhinteen!

4-Bal maxaad shirka Rabbiga cidladan u keenteen si aan annaga iyo lo'dayaduba halkan ugu wada dhimanno?

5-Oo maxaadse dalkii Masar nooga soo bixiseen, oo aad meeshan sharka ah noo keenteen?  Waayo, meeshanu ma aha meel laga helo midho, ama berde ama geed-canab, amase rumaanno, oobiyo la cabbona laguma arko.

-Markii reer binu Isra'aiil ay biyo waayeen, miyey rumay-snaayeen in Ilaah biyo siin karo?
-Maya.

-Maxay reer binuIsraa'iil sameeyeen?
-Waxay eedeeyeen Muuse iyo Haaruun.

-Maxay reer binu Israa'iil sameeyeen markii ay biyo waayeen?
-Waxay Ilaah weyddiisteen inuu iyaga biyo siiyo.

-Bari hore, waa intii ay cidlada marayeene, Ilaahw uxuu iyaga biyo ka siiyey dhagax cidlada yaal.

-Masxay reer binu Israa'iil Ilaah u weyddiisan waayeen biyo?

-Waayo Ilaah ma ayan rumaysnayn.



-Maanta, dad badan ayaa la mid ah reer binu Israa'iil.

-Weliba inkastoo Ilaah siiyo roob, oo beeraha gallaydana ay u baxaan, haddana dad badan ma rumaysna Ilaah.

-Maxa Muuse iyo Haaruun markii biyala'aantu dhacday?

Bal aynu akhrinno Tirintii 20:6

6-Markaasay Muuse iyo Haaruun ururka hortiisii uga tageen iriddii teendhada shirka, kolkasay wejiga dhulka dhigeen, oo waxaa iyagii u muuqatay ammaantii Rabbiga.

-Muuse iyo Haaruun waxay rumaysteen Ilaah.
-Muuse iyo Haaruun waxay Ilaah weyddiisteen inuu biyo siiyo.

-Miyaa Muuse iyo Haaruun awoodeen inay reer binu Israa'iil biyo siiyaan?
-Maya.

-Maxay u awoodi waayeen?
-Waayo waxay joogeen lama-degaanka.

-Haddii Ilaah uusan biyo siin lahayn reer binu Israa'iil, maxaa dhici lahaa?

-Reer binu Israa'iil oodhan way dhiman lahaayeen.

-Myaa Ilaah haddaba goostay inuu reer binu Israa'il siiyo biyo?

Bal aynu akhrinno Tirintii 20:7-8

7-Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi,
8-Usha qaado, oo adiga iyo walaalkaa Haaruun dadka sharka ah oodhan soo shirka oo dhan soo shiriya, oo iyagoo arkaya dhagaxa la hadla, biyo ha soo daayee; oo waa inaad iyaga dhagaxa biyo uga keentaa, si aad u wada waraabisid shirka iyo lo'doodaba.

-Maaddaama Ilaah jeclaa reer binu Israa'iil, wuxuu goostay inuu iyaga siiyo biyo.

-Maxaa Ilaah ku amray Muuse?

-Ilaah wuxuu Muue ku amray inuu dhagaxa la hadlo?

-Wakhtigii hore markii reer binu Israa'iil ay doonayaan biyo, Ilaah wuxuu Muuse ku amri jiray inuudhagaxa wax ku dhufto.

-Haatan, Ilaah wuxuu Muuse ku amrayaa inuud hagaxa la hadlo.

-Muxuu Muuse sameeyey?

Bal aynu akhrinno Tirintii 20:9-11

9-Markaasaa Muuse ushii ka qaatay Rabbiga hortiisa, siduu isaga ugu amray.
10-Kolkaasay Muuse iyo Haaruun ururkii oodhan ku soo uruiyeen dhagaxa hortiisii, oow uxuu iyagii ku yidhi, War hal maqla, caasiyiin yahay. Dhagaxan biyo ma idiinka soo daynaa?
11-Kolkaasaa Muuse gacanta kor u qaaday, oodhagaxii ayuu ushiisii laba jeer ku dhuftay, oo waxaa ka soo baxay biyo aad u badan, ooshrkii iyo lo'doodiiba way wada cabbeen.

-Miyaa Muuse la hadlay dhagaxa?



-Maya.

-Muxuu Muuse sameeyey?
-Laba goor ayuu dhagaxa ushiisa ku dhuftay?

-Waayo wuxuu aad ugu caraysnaa reer binu Israa'iil.

-Markii uu sidaas yeelay miyuu Muuse Ilaah u gefay?
-Haa.

-Maxaa Ilaah ku yiri Muuse iyo Haaruun?

Bal aynu akhrinno Tirintii 20:12

12-Markaasaa Rabbigu Muuse iyo Haaruun ku yidhi, Idinku ima aydaan rumaysan, oo qoduusna igama aydaan dhigin reer binu Israa'iil hortooda, haddaba sidaas daraaddeed idinku shirkan geeyn maysaan dalkii aan iyaga siiyey.

-Maadaama Muuse iyo Haaruun ayan dhagaxa la hadlin, balse intii uu sidaas yeeli lahaa uu laba goor usha ku dhuftay dhagaxa, taas aawadeed miyaa Rabbigu iyaga ciqaabay?

-Haa.
-Sidee baa Ilaah u ciqaabay Muuse iyo Haaruun?

-Ilaah wuxuu u sheegay iyaga inaanay geli doonin dhulkii Kancaan.

-Markii xilligii Haaruun dhiman lahaa uu yimid, Ilaah wuxuu Muuse ku yiri Haaruun waxaad geysaa Buur halkaas u dhowayd.

Bal aynu akhrinno Tirintii 20:23-25 & 28

23-Markaasaa Rabbigu Muuse iyo Haaruun kula hadlay Buur Xor, oo ku ag taal soohdinta dalka Edom oo wuxuu ku yidhi,
24- Haaruun wuxuu ku darman doonaa dadkiisii, waayo, isagu geli maayo dalkii aan siiyey reer binu Israaiil, maxaa yeelay, hadalkaygii waad ku caasideen markaad biyihii Meribaah ag joogteen.
25-Haddaba Haaruun iyo wiilkiisii Elecaasaar soo wad,oo waxaad iyaga keentaa Buur Xor.
28-Markaasaa Muuse Haaruun ka bixiyey dharkiisii, oo wuxuu u geliyey wiilkiisii Elecaasaar, markaasaa Haaruun ku dhintay halkaas oo ahaa buurtii dhaladeeda; kolkaasay Muuse iyo Elecaasaar buurtii ka soo degeen.

-Haaruun wuxuu ku dhintay buurta dhaladeeda.

-Miyaa Haaruun galay dhulkii Kancaan?
-Maya.

-Waa maxay sababta?
-Waayo Haaruun Ilaah buu addeeci waayey.

-Miyaa Ilaah dhowraa Hadalladiisa?
-Haa.

-Ilaah wuxuu mar waliba dhowraa Hadalladiisa.

-Yaa qaatay jagadii Haaruun?
-Wiilkii Haaruun ee ahaa Elecasaar.

-Wakhti kaa ka dambeeyey, ayaa reer binu Israa'iil haddana ay



bilaabeen inay gunuusaan.

Bal aynu akhrinno Tirintii 21:4-5

4-Oo Buur Xor waxay uga guureen xagga jidka loo maro Badda Cas inay hareer ka maraan dalka reer Edom. Markaasay dadku aad u qalbi jabeen jidkii daraaddiis.
5-Oo dadkii waxay ku hadleen wax ka gees ah Ilaah iyo Muuseba, oo waxay yidhaahdeen, War dalkii Masar maxaad nooga soo bixiseen si aannu cidladan ugu dhimanno? Waayo, kibi ma jirto, biyona ma jiraan, oo naftayduna kibistan khafiifka ah way ku yaq-yaqsataa.

-Inkastoo Ilaah reer binu Israa'iil siiyey biyo, haddana dacwad bay weli qabaan.

-Maadaama reer binu Israa'il ay dacwad qabaan, maxaa Ilaah ku sameeyey iyaga?

Bal aynu akhrinno Tirintii 21:6

6-Markaasaa Rabbigu wuxuu dadka dhexdiisii ku soo daayey abeesooyin qaniinyo kulul oo ay dadkii qanqaniineen, oo dd badan oo reer binuIsraa'iil ah ayaa dhintay.

-Ilaah wuxuu ciqaabay reer binu Israa'iil isagoo u soo dirya iyaga masas qaniinyo kulul ama mariid leh.

-Masaska mariidka leh meel waliba ayey dadsanaayeen.

-Kuwo badan oo reer binu Israa'iil ahina waxaa qaniinay masaska oo way wada dhinteen.

-Sidee baa haddaba dembiga iyo masaska laysugu bar-bardhigaa?

-Isla sida qaniinyada Maska, ay reer binu Israa'iil ugu dhinteen, ayaa daannada dembigana loogu dhintaa.

-Miyaa reer binu Iraa'iil ay awoodeen inay ka baxsadaan qaniinyada Masaka?
-Maya.

-Maxaa sabab u ah?
-Waayo masasku meel waliba ayey daadsanaayeen.

-Markii Ilaah go'aansaday inuu ciqaabo ddka aan isaga rumaysnayn, ayaanay dadku helaynin meel ay ku baxsadaan.

-Maalmihii Nuux, markii daadkii yimid, miyaa kuwii doonta dibadda ka joogay ay baxsadeen?
-Maya.

-Maalmihii Sodom iyo Gomorrah, ma waxaa jirtay si ay ku baxsan karaan dadkii magaalooyinka degganaa?
-Maya.

-Miyaa Luus xaaskiisii markii ay gadaal u fiirisay Sodom iyo Gomora ay baxsatay?
-Maya.

-Markii Ilaah go'aan ku gaaray inuu ciqaabo dadka aan isaga rumaysnayn, ayaan la helaynin meel ay dadkaasu isaga kaga baxsan karaan.

-Markii kuwo badan oo reer binu Israa'iill ah ay dhinteen, maxay



intii hartay ee reer binu Israa'iill samaysay?

Bal aynu akhrinno Tirintii 21:7

7-Markaasay dadkii Muuse u yimaadeen, oo waxay ku yidhaahdeen Annagu waannu dembaabnay, maxaa yeelay, waxaannu ku hadalnay wax ka gees ah Rabbiga iyo adiga, haddaba Rabbiga noo bari inuu abeesooyinka naga fogeeyo. Markaasaa muuse dadkii u baryay Rabbiga.

-Miyaa reer binu Israa'iil ay qirteen dembigooda?
-Haa.

-Miyaa reer binu Israa'iil ay Muuse iyo Ilaah weyddiisteen inuu caawiyo?
-Haa

-Miyaa reer binu Israa'iil awood u heleen inay masaska iska badbaadiyaan?
-Maya.

-Miyaa Muuse awooday inuu ka badbaadiyo reer binuIsraa'iil Masaska?
-Maya.

-Kuma ayuu ahaa Kan keliya ee awooday inuu ka badbaadiyo reer binuIsraa'iil Masaska?
-Illaah.

-Miyaa Ilaah caawiey reer binu Israa'iil?

Bal aynu akhrinno Tirintii 21:8-9

8-Oo Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Abeeso samee, oo tiircalna kor saar, oomid kasta oo la qaniinoba, markuu arko wuu noolaanayaa.

9-Oo Muuse baa abeeso naxaas ah sameeyey oo wuxuu kor saaray tiirkii canalka, oo haddii abeeso qof qaniinto oo qofku soo eego abeesadii naxaasta ahayd wuu noolaan jiray.

-Maxaa Ilaah Muuse u sheegay si reer binu Israa'iil loo badbaadiyo?

-Inuu naxaas ka sameeyo mas, oo dabeetana tiir uu ka soo laadlaadiyo.

-Haddii reer binu Israa'iil ay ahayd inay dhimasho ka badbaadaan, maxay ahayd inay sameeyaan?

-Waxay ahayd inay maska naxaasta ah ee tiirka laga laadlaadiyey ay fiiriyaan.

Bal aynu akhrinno Tirintii 21:9b

9-Oo haddii ay abeeso qof qaniinto oo qofku soo eego abeesadii naxaasta ahayd wuu noolaan jiray.

-Miyaa reer binu Israa'iil ay soo eegi jireen maskan naxasta laga sameeyey ee tiirka laga soo laadlaadiyey?
-Haa.

-Haddii ay reer binu Israa'iil ay tukadaan, balse aanay fiirinin maska, miyaa Ilaah badbaadinayaa?
-Maya.



-Haddii reer binu Israa'iil ay Illaah siiyaan allabbari, laakiin aanay eegin Abeesada, miyaa Ilaah badbaadinayaa?
-Maya.

-Si reer binuIsraa'iil loo badbadiyo, waxay ahayd inay addeecaan waxa Ilaah ku leeyahay iyaga.

-Si lagu badbaadiyo reer binu Israa'iil awgeed, ayaa waxay ahayd in reer binu Israa'iil ay ku socdaan dariiqa Rabbiga.

-Si loo badbaadiyo awgeed, waa in reer binu Israa'iil ay eegaan maska naxaasta ah oo tiirka la saaray.

-Miyaa maska naxaasta ah lahaa awood uu ku badbaadiyo reer binu Israa'iil?
-Maya.

-Yaa lahaa awood uu ku badbaadiyo reer binuIsraa'iil?
-Ilaah.

-Ilaahh wuxuu badbaadiyey reer binu Israa'iil oodhan, kuwaasoo eegay maskii naxaasta ahaa ee tiirka saarnaa.

-Miyaa dembigii reer binu Israa'iil dalbanayey dhimasho?
-Haa.

-Weliba inkstoo dembigii reer binu Isra'aiil uu dalbanayey dhimasho, maxaa Ilaah u sameeyey kuwii eegay maska?

-Ilaah wuu badbaadiyey.